

Yaa Tacadiga Gaysta?

Tacadiga cida gaysanaysaa waxa ay noqon karaan dad muxibbo iyo wanaag kuu muujiya marka kowaad ee la kulanto. Waxaa dhici karta inay wanaagsan yihiin marka dadka lala joogo, laakiin ay kugu tacadiyaan marka aad isku kaliyaysataan. Waxaa dhici karta inuu ku raaligeliyo kadib isla markaba marka uu wax ku yeelo, laakiin wixii tacadi ah—xataa haddii ay dhacdo mar oo ay u muuqado wax ka baxsan tacadiga—waxa uu noqon karaa calaamad wax ka daran oo soo socda.

Noocyada Tacadiga

Tacadigu waxa uu qaadan karaa qaabab badan. Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay wax ka mid su'aalahan, waxaad heli kartaa caawimo.

- Lamaanahaagu musharkaaga miyuu iska qaataa ama uu iska haystaa adiga oo aan u oggolayn?
- Lamaanahaagu miyuu eegaa taleefanaadaada/fariimaha qoraalkaaga oo miyuu ku waydiiyaa meesha aad joogto marka aydaan wada joogin?
- Lamaanahaagu miyuu xadidaa wakhtiga aad asxaabta ama qoyska la qaadanayso?
- Ma ka baqataa lamaanahaaga?
- Lamaanagaagu miyuu xanaaqaa badanaa ama marka uu sakhraamo?
- Lamaanahaagu miyuu kugu qaylyaa ama miyuu ku jajabiyaa shayo agtaada?
- Weligaa lamaanahaagu miyuu ku riixay ama ku feedhay? Cunaha ku qabtay ama ku dhirbaaxay? Ku qaniinay ama ku gubay? Kusoo jiiday ama kusoo qabtay timaha?
 - Lamaanahaagu miyuu kugu khasbay inaad galmo samayso ama inaad u raaxayso isaga/iyaga adiga oo aan doonaynin?
 - Lamaanahaagu miyuu kuugu hanjabay inuu ku waxyeeleynayo ama ku khaarajin doono? Ama inuu isdili doono haddii aad ka tagto?

HADDII AAD U BAAHATO BADBAADO DHAKHSO AH

- Haddii ay suurtoagal tahay, isku day inaad baxdo ama inaad cawimaad hesho.
- Cid la hadal. Ogaysii jaarka ama la hadal bilayska.

Refugee Women's Alliance

Xafiiska Guud

4008 Martin Luther King, Jr. Way S.
Seattle, WA 98108
Taleefan: (206) 721-0243
Faakis: (206) 721-0282
TTY: (206) 721-5299

Xafiiska Tacadiga Guriga Dhaxdiisa

PO Box 14373
Seattle, WA 98114
Taleefan: (206) 721-0243
Faakis: (206) 721-3967

Khadka tooska ah (24 saacadood)

Ruush, Romaaniyaan, iyo Yukreeniyaan: (206) 954-2903
Soomaali: (206) 310-5841
Fiitnaam: (206) 351-8809
Amxaari iyo Tigrigna: (206) 495-5256

Luuqadaha Aanu Ku Shaqayno

Amxaari	Lao	Sawaaxili
Tigrigna	Barmiis	Kikuyu
Soomaali	Carabi	Talyaani
Ruush	Faransiis	Daari
Romaaniyaan	Jarmal	Bashtu
Yukreeniyaan	Isbaanish	Farisi
Thai (Thaay)	Fiitnaam	

www.rewa.org



Qof miyuu ku wax yeelaa?

(206) 721-0243

Sirtaada ayaa mudnantaayada kowaad ah.

Waa maxay Tacadiga Guriga Dhexdiisu?

Tacadiga Guriga Dhexdiisa waxa uu ku dhacaa qofka marka qof xidhiidh jacayl ka dhaxeeyaa uu u arko inuu xaq u leeyahay inuu maamulo oo uu dareenka, habdhaqanka, iyo/ama talaabooyinka qofka kale dhaleeceeyo. Tacadigeedu ama qaabka uu u maamulayaa waxa ay noqon karaan qaabab kala duwan: tacadi jidheed, galmo, iyo/ama dareen. Maaha inaad xishooto haddii uu qof kuu gacan qaado. Adigu ma lihid khaladka.

Xuquuqdaada

Tacadiga iyo gaboodfalku guriga waa sharci daro Maraykanka. Tacadiga guriga dhibanayaashooda waxaa ilaaliya sharciga.

Waxaad Samaynayso

- Waxaad kala hadashaa qof aad ku kalsoon tahay: saaxiib, qaraabo, ama qof aad wada shaqaysaan ama bulshada aad isku diinta tihiin.
- Lasoo hadal 24 saacadood adeega wax-ka-qabadka mushkiladda. Waxay ku siin karaan macluumaad ku saabsan tacadiga guriga dhexdiisa ah iyo ikhtiyaarada sharci ee kuu bannaan, oo ay ku jiraan dacwayn ama sida aad u heli karto amar naftaada lagu ilaalinayo. Waxay bixiyaan kooxo la-talin iyo taageero.
- Waxaad abuurtaa qorshe badbaado oo adiga iyo qoyskaaga ah.

ADIGU waxaad tahay khabiirka nololahaada. Qofka ha ka oggolaan inuu kuu sheego inaad samayso wax kaasi oo khaldan ama adiga kuu badbaado ahayn.

Barnaamijka Tacadiga Guriga Dhexdiisa ReWA

ReWA waxa uu siiyaa u-doodis dhammaystiran oo dhaqan ahaan munaasab ah iyo taageero dadka soo galaytiga ah iyo qaxootiga dhibanayaasha tacadiga qoyska iyo/ama tacadiga galmada oo ay ku jiraan:

- Taageero dhaqan iyo luuqadeed in ka badan 20 luuqadood, oo ay ku jiraan khadka toos ah oo toddoba (7) luuqadood ah
- Kaalmo dalbashada amarada ilaalinta ah iyo samaynta qorshayaasha badbaado
- Kooxaha taageero iyo la-talinta caafimaadka maskaxada ee dumarka ay lasoo daristay tacadiga ama kuwa ugu jira khatar tacadi
- U gudbinta khayraadka bulshada, adeegyada guryaynta, iyo hoyga xaaladaha degdegga ah
- Waxbarashada iyo barnaamijka wacyi gelinta bulshada si kor loogu qaado wacyi gelinta iyo si gacan looga gaysto kahortagga tacadiga guriga iyo tacadiga galmada ee bulshooyinka qaxootiga iyo soo galaytiga ah
- Wada tashiga iyo tabobarka adeeg-bixiyayaasha adeegga iyo hay'adaha bilayska

Sanad kasta waxaanu ka caawinaa wax ka badan 1,000 ruux inay ka tagaan cidii ku tacadiyi jirtay oo bilaabaan nolol cusub.



Khayraadka

Xaaladda Degdegga ah

Bilayska (Xaaladda Degdegga) 911

Tacadiga Guriga Dhexdiisa

National Domestic Violence Hotline
1 (800) 799-7233

Khadka Caawimada Ammaanka Guriga
1 (888) 847-7205

Adeegyada Tacadiga Dumarka Dhagaha La'
(ADWAS) (206) 922-7088

Khadka Caawimada API Chaya (877) 922-4292 /
Xafiiska (206) 467-9976

Adeegyada La-talinta & Gudbinta Consejo
(206) 461-4880

Dalladda Northwest ee Labeebka, Dadka Jinsiga
Badalay, Dumarka Khaniisiinta ah iyo Ragga
Khaniisiinta ah ee Ka Badbaaday Tacadiga
(206) 568-7777

Iskaashatada Dumarka Qaxootiga (ReWA)
(206) 721-0243

Guddida Caafimaadka Seattle Indian (206) 324-9360

Guryaynta/Hoyga

Broadview Emergency Shelter (206) 299-2500

Dalladda Dumarka Guriga Dhexdiisa Lagu Tacadiyo
(DAWN) 1 (877) 465-7234

East Cherry YWCA (206) 568-7845

Lifewire (425) 746-1940 / 1 (800) 827-8840

New Beginnings (206) 522-9472

